

# Faahfaahinta

“Baaritaan” haddii si kale loo yiraahdo waa dib-u-eegis. Markaanu ogaano inay jiraan arrimo su’aal ka keenaya haddii cidi ay mutaysatay faa’idooyin, waxa sharci ahaan la nooga baahan yahay inaanu codsano oo aanu dib u eegno macluumaad dheeraad ah.

## GOORMA AYUU BAARITAANKU BILAABMAA?

Kadib markaad noo soo dirto sheegashadaada faa’idooyinka ee ka socda Barnaamijka Caymiska Bilaa Camalka, dib ayaanu u eegi si aanu u go’aamino mutaysigaaga. Sheegashadaadu waxaa dhici karta inay noqoto mid adag ama ay leedahay arrimo nooga baahan inaanu samayno si aanu u samayno dib-u-eegid dhammaystiran. Tan waxa la dhahaa baaritaan.

Muddada baaritaanka, waxaanu ka ururin doonaa macluumaad adiga iyo meel kale oo kasta oo ay nala gasho. Tusaale, haddii arrintu la xiriirto shaqaalayntaadii ugu dambaysay, waxaanu caadi ahaan macluumaad ka ururinaa loo-shaqeeyahaagii hore sidoo kale. Intaa kadib waxaanu dib u eegnaa macluumaadka aanu hayno, ku dabbaqnaa shuruucda iyo xeerarka caymiska bilaa camalka xaaladdaada, oo go’aan gaarua.

## WAA MAXAY SABABTA SHEEGASHADAYDA DIB LOOGU EEGAYO?

Barnaamijka Caymiska Bilaa Camalku wuxuu siiyaa faa’ido dadka waayey shaqooyinkooda ama saacadaha ay shaqeeyaan loo yareeyo sabab aan iyaga ka iman. Waxaa waajib ah inay dadku diyaar u yihiin shaqo, awoodaan shaqo, oo u raadinayaan si firfircoon shaqo toddobaad kasta si ay faa’idada u heli karaan. Haddaanu ogaano inaad buuxinayn shuruudahan, waxaa waajib nagu ah inaanu baarno arrinta oo go’aan ka gaarno haddii aad mutaystay faa’idooyinka.

Waxaad ka heli kartaa liis ah sababaha caamka ah oo aad akhrido [unemployment.oregon.gov/adjudication](https://unemployment.oregon.gov/adjudication).

# Faahfaahinta

## MUDDO INTEE AH AYAY DIB-U-EEGISTU QAADAN DOONTAA?

Waxaanu dib ugu eegnaa sheegashooyinka sida ay u soo kala horreeyeen, laakiin arrimaha cakiran waxay qaadan karaan wakhti dheeraad ah dib-u-eegistoodu. Waxaanu u baahannahay inaanu la hadalno dhinacyada ku lugta leh oo dhan, xaqiiqada uruurino, shuruucda dabbaqno, oo ka gaarno go'aan caddaalad ah haddii aanu diidayno ama oggolaanayno faa'idooyinka.

Waanu ognahay inay adkaan karto sugitaanka faa'idooyinka muddada aanu ku jirno dib-u-eegista. Samaynta dib-u-eegid dhammaystiran iyo helitaan xaqiiqooyinka oo dhan waxay naga caawiyaan inaanu ka ilaalino dadka reer Oregon khayaano iyo dhibaataada cid in la siiyo lacag dheeraad ah oo aysan mutaysan. Lacagaha dheeraadka ah ee cid la siiyo iyadoon mutaysan waa marka aad hesho faa'idooyin adigoo aan xaq u lahayn inaad hesho, waxaana waajib ah inaad soo celiso.

## SIDEED IILA SOO XIRIIRI DOONTAA?

Haddii sheegashadaadu u baahato baaritaan, baare – qofka baaraya sheegashadaada – ayaa kugula soo xiriiri taleefan, boostada, iyo iimeyl. Farriin qoraal ah kuu soo diri mayno. Haddii aad leedahay taleefan, fadlan taleefanka qabo, xataa haddii lambarku qarsoon yahay, oo hubi in farriintaada codku ay kuu furan tahay si markaa cidda kaa soo wacaysa Waaxda Shaqaalaysiinta ee Oregon ay kuugu dhaafi karto farriin cod ah.

Fadlan ka jawaab dhammaan waraaqaha iyo farriimaha codka ah ee kaaga imanaya Waaxda Shaqaalaysiinta ee Oregon. Haddii shaki kaa galo in farriini annaga naga timi iyo in kale, ama haddii aad ka shakido in farriimaha qaar ay khayaano ku jiri karto, fadlan nala soo xiriir si aanu kuu kaalmayno. Hubi inaad cusboonaysiiso ciwaankaaga deegaanka Frances Online barta [frances.oregon.gov](https://frances.oregon.gov).

# Faahfaahinta

## HADDA MAXAAN SAMEEYAA, SIDEENA U KORDHIN KARAA DHAKHSAHA DIB-U-EEGIDDA?

1. Sii wad inaad xerayso sheegashooyin toddobaadle ah muddada dib-u-eegistu socoto si markaa aad ugu hesho mutaysi toddobaadyadaada. Haddii aanu go'aamino inaad mutaysatay faa'idooyinka lacagta ah, waxaa kaliya lagu siin karaa lacagta toddobaadyada aad wakhtiga loogu talagalay ku sheegatay. Ma soo laaban kartid oo ma sheegin kartid mar dambe.
2. Fdilan ka jawaab waraaq kasta oo aanu kuu soo dirno. Waxaad farriinta kaga soo jawaabi kartaa boostada ama isticmaal foomka Contact Us. Macluumaadka aanu codsano waa isbadbaddalaa. Tusaale ahaan, waxaanu ku waydiisan karnaa inaad:
  - Caddayso macluumaadka loo-shaqeeyahaaga
  - ka soo warbixiso shaqo raadintaada toddobaadlaha ah
  - Sharraxdo sababta aad shaqo uga tagtay, lagu eryey, ama u diiday shaqo cusub adigoo faa'idooyin sheeganaya
  - Bixiso macluumaad haddii aadan u diyaarsanayn ama awoodin inaad shaqayso adigoo faa'idooyin sheeganaya
  - Cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka
3. Haddii aad leedahay taleefan, xaqiiji in farriintaada codku ay kuu furan tahay si markaa cidda kaa soo wacaysa Waaxda Shaqaalaysiinta ee Oregon ay kuugu dhaafi karto farriin cod ah.
4. Fadlan ka jawaab dhammaan waraaqaha iyo farriimaha codka ah ee kaaga imanaya Waaxda Shaqaalaysiinta ee Oregon. Haddii shaki kaa galo in farriini annaga naga timi iyo in kale, ama haddii aad ka shakido in farriimaha qaar ay khayaano ku jiri karto, fadlan nala soo xiriir si aanu kuu kaalmayno. Sida ugu fudud ee ugu dhakhsaha badan ee aad macluumaad noogu soo diri karto waa adigoo isticmaala foomkeena Contact Us [unemployment.oregon.gov/contact](https://unemployment.oregon.gov/contact).

## KA WARAN HADDII AAN DIIDO GO'AANKA?

Dhammaadka dib-u-eegisteena, waxaanu go'aamin doonaa haddii aad mutaysatay faa'idooyinka ama haddii kale. Waxaanu kuu soo diri go'aan siday doonto ha u dhacdee. Haddii aadan oggolaan go'aanka, waxaad xaq

[unemployment.oregon.gov/adjudication](https://unemployment.oregon.gov/adjudication)

## Faahfaahinta

u leedahay inaad rafcaan qaadato oo aad codsato dhagaysi uu qabto qaaddi sharciga maamul qaabilsan. Loo-shaqeeyahaagu sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aanka aanu ka qaadano sheegashadaada. Haddaad go'aansato inaad rafcaan qaadato, sii wad inaad sheegato faa'idooyinka adigoo sugaya natiijada dhagaysiga.

Waxaanu kuu soo diri go'aanka waxaana la socon doona tilmaamo ku saabsan sida rafcaan loo qaato. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa [unemployment.oregon.gov/appeals](https://unemployment.oregon.gov/appeals).

# Faahfaahinta

## KA WARAN HADDII AAN U BAAHDO CAAWIMAAD HADDA?

Baaritaanku wakhti ayuu qaataa, waana mid aanu ka garaabayno inaad caawimo hadda u baahan karto. Waa kuwan khayraadka qaar, sida cayminta caafimaadka, iyo linkiyo ku gaynaya caawimo kale oo ka jirta bulshadaada dhexdeeda.

### WorkSource Oregon

Xafiisyada WorkSource Oregon waxay shaqaalaha ku xiraan dhigaallo si ay u dhisaan mihiyo aad u fiican. Dadku waxay ka qaadan karaan koorsooyin, waxay ka heli karaan caawimo waraaqaha shaqada ah, waxay ka heli karaan gudbino shaqooyin, iyo waxyaalo kale goobo gobolka oo dhan ku kala yaala – ama onlayn!

Macluumaad ku saabsan adeegyada iyo goobaha waxaa laga heli karaa [workssourceoregon.org](http://workssourceoregon.org).

### Cayminta caafimaadka

Haddaad waydo cayminta caafimaadka amase aadan lahayn cayminta caafimaadka, waxaa dhici karta inaad u qalanto qorshe caafimaad oo bilaash ah ama qiime jaban. Booqo [healthcare.oregon.gov](http://healthcare.oregon.gov) ama wac 1-855-268-3767.

### 211info

211info waxay kaa caawin karaan helitaanka khayraad kale oo laga heli karo Oregon ama bulshada deegaankaaga, sida caawimo ku saabsan iska bixinta lacagta kirada, qaanta adeegyada, iyo helitaanka faa'idooyin kale.

Booqo [211info.org](http://211info.org) si aad wax badan u ogaato iyo si aad u ogaato khayraadka meelaha loogu hagaago. Sidoo kale waxaad: Wici kartaa 2-1-1 ama 1-866-698-6155 (tarjumaano luuqadda ah oo bilaash ah ayaa diyaar ah) Dadka Maqalka Naafada ka ah ha taabtaan 711 oo ha wacaan 1-866-698-6155

ZIP Code-kaaga farriin qoraal ah ugu dir 898211 (TXT211) (Ingiriisi iyo Isbaanish) limeyl [help@211info.org](mailto:help@211info.org) (Ingiriisi iyo Isbaanish)